@SOMALIBOOKS

Dhoodaan: Maansoyahan aan kaalintiisii la Buuxin karin

W/ Q Rashiid Sheekh Cabdillaahi (Gadhweyne)
May 09, 2013

Cabdillaahi Macallin Axmed (Dhoodaan), Alle ha u naxariisto. Geeridiisa waxaa ku baxay gabayaa iyo abwaan aan marna meeshiisii cid buuxisa la heleynin. Hibadiisa halabuurnimo qof aan barbardhigo, marka ay tayda tahay, ma garanayo. Dhoodaan, Alle ha u naxariisto, maanso ahaan, waxaan ku tilmaami karaa ifafaale ay soo noqnoqoshadiisu dhif tahay.

Waxa uu gooni ku ahaa quwadda ereyadiisa maanseed, suuraynta fikradda uu soo tebinayo, hodantinnimada aqoonta iyo tusmaynta nolosha miyiga iyo xoolodhaqatada Soomaaliyeed iyo erey-tusmeedyada degaanka iyo waayahiisa kala duwan oo ay yar tahay cid ku gaadhi kartaa, haddii la helo ba. Waxaan ereyo kooban hadda ku soo tebinayaa tusaalooyinka ku saabsan wax aan u la baxay murti gabay ama gabay ku maahmaah iyo ta kale oo iyana ah maansaynta maahmaahda Soomaaliga. Ta hore waa dhismaha sadarka ama beydka maanseed iyo ilaa tuduca oo loo dhigo sansaan maahmaaheed; ta dambe na waa maahmaahdii Soomaalida oo la maanseeyo. Faallo badan ka geli maayo ee tusaaleyaasheeda ayaan u badanayaa.

Waxaa la odhan karaa oo run ah kelidii ma aha; waxaase iyana run ah haddii ay cidi gabay ku maahmaahday, heerka Dhoodaan, Alle ha u naxariist'ee, cidina ka ma gaadhin. Waxa uu cid walba dheeraa sida iyo ilaa xadka uu maansayn jiray maahmaada soomaaliga. Labada tixood ee Garnaqsi iyo Galaal-xoor, ayeynu maahmaahyaha ku soo arooray meelo ka daymoonaynaa. Gabay ku maahmaahiisa ku jira garnaqsi waxaa ka mid ah:

Kol Hadd'ay garkaa iyo garkaa geesna qaban waydo,
Inaad gebi-dhacdaa way xun tahay oo'd galgalataaye,
Bari iyo galbeed xaajo waa mid u gawaan raac.

Haddii aynu weliba sii raac-raacno tuducyada hore ee Garnaqsi waxaynu ugu tegeynaa gabay-ku-maahmaah aan kala go' lahayn. Waxa ka mid ah:

Kurus geel siddeed jir ah mar bay guduri dhaantaaye,
Guduudane mar buu kuu noqdaa aar gaboodya lehe,
Gendi weheshad baa kaaga roon xoonsho guruc dheere,
Gudcurk'iyo caddadu waa midk'aan gibilku saarrayn.

Waxaa ka sii badan oo runtii aan garan waayey cid ku la mid ah maansaynta maahmaahda lafteeda. Xaaladda labada gabay ee aynu tusaalaha ka dhigaynay waxay igu dirqiyeysaa in aan tuducyada sidooda u taxo oo aan faallada faraha ka qaado. Waxa uu Dhoodaan, Alle ha u naxariist'ee yidhi:

Gojaxada ka weyn ee guntiga lagu gufaynaayo,
Iska gudub gantoobkeedu shay taana way gabi,
Ka gilgilo gantaal kugu dhacaa kaaga go'i waaye,
Gordan, goorri iyo gowracii lay's la garan waayey,
Cilmig'aan ka gooddiyahay'aa taa ka guda weyne.

Waxaa la odhan jiray: " Gojoxo geel wax gunti la geliyo ka weyn"; Waxaa kale oo la odhan jiray: "fallaadhi gilgilasho kaaga ma hadho"; waxaa iyada na sheeko maahmaaheed ahayd saddexdii erey ee

Telegram @SOMALIBOOKS

Copyright © 2013 WardheerNews,
All rights reserved

@SOMALIBOOKS

isku ujeeddada ahaa ee la isku fahmi waayey. Sheekadii maska iyo ninkii ka abaaldhacay ayaa ayaduna gabaygan meel ay leedahay kaga jirta. Sida uu u maanseeyey baa la yaab leh,

Maskii good ahaa iyo ninkii loo garqaadahayey,
Guurtida markii loo wac'ee taladii loo guulay,
Cid gun-gaadha xaajada markii goobtii laga waayey,
Waxay gocatay o'y eersat'oo gebagebo'w diiday,
Waa masaartu xididk'ay gash'iyo gabak'ay aaseen.

Gabaygan Garnaqsi xanuun baa keenay; waxa ka dhadhmaya ciil iyo gocasho; nin wanaag falay oo xumo looga abaal-dhigay. Waxaa kale oo ku jira isguhaadin naftiisa ah iyo gooddin ku aaddan ninka uu la hadlayo. Tiiraanyada, tabashada, canaanta naftiisa iyo inta uu la toyasho yahay, waxa uu inagu soo gaadhsiinayaa ereyo sarbeeb iyo duurxul shareer ah oo dhinac fog ka soo wareegaya. Goor dambe ayuu u imanayaa ujeeddada ninka uu gooddiyo oo halkaas ayey tixdu marka dambe ku gororaysaa. Haddii aad is-tidhaahdo tixdan kala gur, ama tidhaahdo bal koobkoobi ereyada, suuradaha ama hummaagyadeeda, adduunka ay mar ba dhinac kaa tusayso, ka ma geyoonaysid. Waa maan-daalis ama aan idhaahdo maan-daraandarin(sublime), inta maskaxdu qaadi karto ka weyn. Xataa tusaalaha sadarro laga soo qaadaa waa garooc; qalinku wuu kula taraaraxaa oo si aad u soo qabato ma garanaysid. Maragga hodannimada luqada suugaaneed ee Soomaaligu waa maansada Dhoodaan. Afsoomaaliga suugaan-qaadka ah ee tixdiisu waa badweyn lagu hafanayo. Waxaa maansooyinkiisa Garnaqsi iyo Galaal-xoor oo kale hoos ugu dhaashici kara qof ku xeeldheer aqoonta afka soomaaliga, suugaan iyo dhaqan ba; ku na darsaday oo fahmaya arrimaha uu ka maansoonayo Dhoodaan. Kii kale ba wuu ku ambanayaa. Waxaa inoo tusaale ah sadarradan aynu hoos ku taxnay:

Gucunkeeda maansadu halk'ay gacan-toglaynayso,
Guulaanti xididdaysat'iyo guurti laga yaabay,
Goljeex iyo maddo ba way helaan in ay ku goobaane,
Ma gartaan gibbaank'oo dhan iyo Jaalle Goray ciil.

Sarbeebta iyo duurxulka maansada Dhoodaan waa tu ujeeddada kaga imanaysa dhinac durugsan. Bal hadda u fiirso tuducan oo qudh ah sida uu u dhigayo:

Adigaa garaad lehe cabdow nimanka gaagaaban,
Guddoon waxaad u sheegtaa ergada kii 'ad garan weydo,
Galoofyahay garaadkaa int'aad gaar isu la showrto,
Shaki hadd'uu ba kaa galo ad'oon goolka dhalinaynin,
Kubbadaa gabaacuulsan laad ha'w giraangirin dheh.

Cid uu asagu og yahay buu hadalka ugu duurxulayaa. Canaan iyo guubaabin uu ragannimada dadkiisa ku noolaynayo ayaa ka dhadhamaysa halkan. Hogatuskiisa halkaas ku aroorayana runtii la ma koobi karo. Sidaas darteed aan kaga hadho sadarradan:

Tix gammuuran oo gaaban oo caynka lgu giijay,
Waxaan arar gadaanka'wgu sudhay ama u guud-saaray,
Suubaan gelgelimeed mark'uu marayo geeleennu,
Waa say awrtu ugu guuxdo o'y halo u goojaan.

Telegram @SOMALIBOOKS

Copyright © 2013 WardheerNews,
All rights reserved

@SOMALIBOOKS

Sannadkii 1986kii, galab aanu fadhinay gurigiisii waagaasa ahaa magaalada Dirdhaba, ayaan hadalkan dadban wax ka weydiiyey; i ma siinin jawaab buuxda ee waxa uu igu soo celiyey su'aal falsafadeed oo waxa uu yidhi gelgelinta maxaa ku jira ee awrka na doobta ka keenaya hashuna la goojinaysaa? Waan gartay. Dadka uu la hadlayo ayuu meel fog wax ka tusayaa.

Galaal Xoor buu si fog ugu talaxtegay labada weji ee aynu soo qaadanay. Waxaad mooddaa gebi ahaan, in gabayga Galaal xoor yahay maahmaah. Waxaa uu ku sii xeeldheer yahay hodantinnimada luqada dhaqanka iyo aqoonta nolosha xoola-dhaqatada Soomaaliyeed iyo waayaha degaankeeda.
Qodobka ay tixdu ku dulmeeraysaa waa dhibaatada hoggaan-xumada bulsheed iyo guuldarradeeda. Maldah, sarbeeb iyo iyo duurxul bay ujeeddadeeda huwinaysaa; qotodheerida murtida na la ma soo koobi karo.
Haddii gabay loo araran jiray, murti guudmar ah oo maahmaahaysan buu ugu gogolxaadhayaa.

Gaylame gefkiisu u' bat'aan geydhasho la'ayne,
Qosol gowsku muuqd'aan u tegin ciil gafuudin 'eh
Mahmaahda waa toban gulcood ii gadhoodhsani eh,
Gudcur raadki' guuraha ku lumay waaga galacdiisa,
Gadaal subaxi' wo,w goobi jiray ruuxa gurayaaye,
Xadhko-gunudka waa laga geyoon ay gammaammadiye.

Inaga oo aan wax intaa ka badan sii guda gelin, waxa ina deeqaya tusaaleyaal dhawr ah oo aynu is-dultaagno. Tuduc iyo sadar kasta oo aad ku sii hakato ba amankaag aan kala go'ayn buu kugu ridiyaa. U fiirso agabka ereyada afsoomaaliga iyo adduunka uu ka soo urusaday iyo sida farshaxannimada faneed leh ee uu u aloosay. Suuraymaha uu isdaba dhigayaa na runtii kala go' ma laha. Waxaa araraha hore ee maansada ku jira:

Wax la yidhi gamaartii lo'd'iyo naag gardhaaf ahiba,
Iyag'aa gabbaan iyo gabn'iyo gees-la-goy dhala e
Oo gaameelo doofaarre iyo uurgasl'ay noqon.

Waxaa kale oo ka mid ah:

Gudah'aan ka soo dari okhole galaxii Ooyaade,
Dush'aan gaawihii oo gingiman kuug soo ganiye,
Mana gebidhacaay'ee biyaha gacantu yey daadin.

Araraynta dheer ka dib, maahmaahyaha uu ujeeddada ugu ambabaxo waxaa ka mid ah:

Guubiskii madow dhegaha way ugu gammuuraane,
Waa na geela bacowgiisa baa loo gol leeyahaye;
Garruunkii hayin ahaa mar buu rara-gubyoodaaye;
Gurgurshaa maroor loogu xidhay caynka ganaciisa,
Kolba gibisha waa in uu rog'oo galangalcoobaa.
Ninkii guro dameer fuuli jiray meydal garabweyn ah,
Goorada hadd'uu kaga dhac'uu guudka kaga boodo,
Uu gacanta kor u baaciy'uu gaw ul kaga siiyo,
Muquuskiina dib u geejiy'oo gulub u kaydeeyo,
Gasariirintaas'uu xarraan jaro-gariiraa.

Telegram @SOMALIBOOKS

Copyright © 2013 WardheerNews,
All rights reserved

@SOMALIBOOKS

Maahmaahyaha iyo sarbeebaha uu huwiyey ayuu si ugu daaray iftiin, oo uu ujeeddada inoo dacal-saaray. Wuxuu yidhi:

Waxaan maqallay gabadh tuugsat'oo baahidu u geysay,
Markii taajir guursaday ma deyn gorof la meerkiiye;
Guddi dhaqan leh iyo guurti iyo gol'iyo xeer-beegti,
Gablan u ma horseed'aan dad ay gacal u sheegteen;
Galsho-miirad laaskii biyo ah kii u godan waayey,
Garrow adag gamaad ka ma qot'iyo gaan u maaxsami.

Mushkiladdii aan xididkeeda hoos loogu daadegin ee aan salkeeda la soo xoqini ma dawowdo. "Milil dusha laga ma dhayo" bay odhan jireen. Maahmaahyaha tixdan Galaal-Xoor, ereyadan kooban kaga ma gungaadhi karno. Sidaas darteed, wax aan kaga hadhayaa labadan tuduc ee soo socda oo maansaynaya maahmaahda kor ku xusan.

Gundhad'iyo haddii uu fadhiyo caabuq gudaheeda,
Gunre iyo samuut'iyo hadd'aad gowlalle ba shiisho,
Wax ma taro galiillaha ku dhoob meel gunaadsanuye.
Gogga tuludda goon yeelat'iyo finan ku geyngeyman,
Cadho golos ah neefkii qab'ee saamo gaatir ah leh,
Googgaarre aan loo duwayn gooni xeradiisa,
Gaanaha intiisii kal'uu dib u galaaftaaye.

Kan labaad, mar kale ayuu ujeeddada gabayga ina dareensiinayaa. Maahmaahyahu sidan bay halkan na u maansaysan yahiin:

Geb mark'uu dareenkii noqd'ee gegi bannaan seexdo,
Rag gadmad'iyo geeryoo dhurwaa gama'a deystaaye;
Kac gardaadi wiil la ma yidhaa xaaduq guummuraye,
In uu gumaradiisii dhaxlaa looga gudayaaye,
Ka ma yara hoggaan gobonnimana gaasa-bixintiiye.

Tu gaar ku ah tixda Galaal-xoor baa jirta oo soo jiidashadeeda leh. waa tu cannaan iyo boorrin ba ku ah dhegeystaha iyo akhristaha tixda. Nin aan Dhoodaan ahayni, malaa waxa uu dhigi lahaa maansada madaxeeda hore oo arar dheer bay noqon lahayd. Asagu wuu gadaal-mariyey. Runtii waa qaab dhismeed aad u xeeldheer. Qaybta dambe waxay ka hadalaysaa ujeeddado tii hore ka duwan. Innaga ayey ina la hadlaysaa oo awoodda garashadeenna ayey tijaabinaysaa; bal mugga maankeenna Alle ha u naxariist,ee Dhoodaan markan ayuu bilkeedayaa. Tu kale oo jirta na wuu ina dareesiinayaa. Waxa ay tahay, qofkeen waliba caroociisa yar ee uu asagu ka garto ayuu maansada gebigeeda ba ku saameelaa, nuxurkeeda ba intaas ayuu ka dhigaa. Ama haddii kale, gabaahiir kale iyo meel aanay jirin buu ula kacaa. Taas ayuu Dhoodaan mar kasta, si weyn uga dareen-qabay. Sidaas darteed, Alle ha u naxariist'ee, wuxuu leeyahay waxa aad garan weydo kii garanaya u la tag.

Hadd'uu gabaygu kaa gows qabsado saan isugu geeyey
Waxay kuugu geeddami qof geya in aad u geysaaye.

Telegram @SOMALIBOOKS

Copyright © 2013 WardheerNews,
All rights reserved

@SOMALIBOOKS

Qaayaha murtida ayuu ku boorrinayaa. Maasadani waa badweyn, murtideeda iyo sansaankeeda faneed lagu maan-daraandarayo oo mar kasta oo aad hoos u sii muquurtaba, gocommo kale iyo hirar hor lehi ayaa soo mudhbaxayaan.

Gabayga badi ba waa lagu luuqeeyaa; luuqaynta dhoodaan se damaq gaar ah bay maansadiisa u yeeshaa. Alle ha u naxariisto, haddii loo ehel iyo mudan yahay, dhaxal weyn buu Soomaali uga tegay.

Rashiid Sheekh Cabdillaahi (Gadhweyne)
Email:inacabdillaahi@yahoo.com

Telegram @SOMALIBOOKS

Copyright © 2013 WardheerNews,
All rights reserved